HAGAHA

AABAHA IYO HOOYADA MUSTAQBALKA

GUUR WANAAGSAN • QOYS WANAAGSAN

QOYS WANAAGSAN WUXUU KA BILAABMAA FAHAM SAX AH OO GUURKA KA HOR AH. BUUGGAN WUXUU HAGAYAA SAFARKA LAGA BILAABO DIYAARINTA GUUR SAX AH ILAA DHISMAHA QOYS DEGGEN, WAALID MASUUL AH, IYO CARRUUR LAGU BARBAARIYO IIMAAN, AKHLAAQ IYO JACAYL.

QORE

ABUKAR MOHAMED NUR

DAABACAADDII KOOWAAD · JUNE 2026

© 2026 Juun, Xuquuqda oo dhan waa dhowran tahay.
Lama daabici karo, lama koobiyeyn karo, lama iibin karo, mana la qaybin karo qayb ama dhammaan buuggan, iyada oo aan fasax laga haysan qoraaga buugga..

HAGAHA

AABAHA IYO HOOYADA MUSTAQBALKA

QORE

ABUKAR MOHAMED NUR

GUUR BARAKO LEH • QOYS GUULEYSTA

© 2026 Juun, Xuquuqda oo dhan waa dhowran tahay.
Lama daabici karo, lama koobiyeyn karo, lama iibin karo, mana la qaybin karo qayb ama dhammaan buuggan, iyada oo aan fasax laga haysan qoraaga buugga.

MAHADNAQ

Marka hore, mahad iyo ammaan oo dhan waxaa iska leh Alle SWT oo ii suurageliyey diyaarinta buuggan. Waxaan uga mahadcelinayaa nimcada aqoonta, fahamka iyo awoodda uu ii siiyey inaan qoro buug ka hadlaya qoyska, tarbiyadda iyo dhismaha jiil wanaagsan oo Muslim ah.

Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa waalidiinteenna qaaliga ah Aabahay iyo Hooyaday kuwaas oo door weyn ku lahaa nolosheyda, tarbiyadeyda iyo horumarkeyga. Jacaylkooda, ducadooda, samirkooda iyo dadaalkooda joogtada ah waxay ii noqdeen iftiin iyo tusaale wanaagsan oo aan ku fahmay qiimaha qoyska iyo waalidnimada wanaagsan.

Alle SWT ha ku abaal mariyo kheyr badan, caafimaad, cimri barako leh iyo Jannatul Firdowsa.

Waxaan sidoo kale mahad gaar ah u dirayaa dhammaan aabayaasha iyo hooyooyinka dadaalka ugu jira korinta carruur wanaagsan oo leh akhlaaq, iimaan iyo masuuliyad. Waalidku waa laf dhabarta bulshada, waana tiirka ugu weyn ee lagu dhiso jiil wanaagsan iyo mustaqbal ifaya.

Mahad iyo qaddarin ayaan sidoo kale u hayaa culimada, macallimiinta, dadka waxgaradka ah iyo dhammaan bulshada ka shaqeysa ilaalinta qiyamka Islaamka iyo horumarinta qoysaska Muslimiinta ah.

Abukar Mohamed Nur
June 2026

HORDHAC

Qoyska wanaagsan waa tiirka ugu muhiimsan ee bulshada wanaagsan. Haddii qoyska uu dhismo si sax ah, waxaa soo baxaya jiil leh akhlaaq, aqoon, iimaan iyo masuuliyad. Buuggan waxaa loo qoray si casri ah oo fudud, si uu uga caawiyo waalidiinta, dhalinyarada iyo qoysaska Muslimiinta ah inay fahmaan muhiimadda jacaylka, wada noolaanshaha, tarbiyadda wanaagsan iyo ilaalinta qiyamka Islaamka.

Buuggan waxa uu si qoto dheer uga hadlayaa sida loo doorto lammaane wanaagsan, sida loo dhiso guri ku dhisan kalsooni iyo ixtiraam, sida carruurta loo barbaariyo xilligan casriga ah, iyo sida technology-gu u saameynayo qoysaska maanta. Waxa kale oo uu bixinayaa talooyin ku saleysan shareecada Islaamka iyo waayo-aragnimada nololeed ee qoysaska casriga ah.

> Qoraalka buuggan waa mid cusub oo si gaar ah loo diyaariyey, waxaana loo habeeyey qaab nadiif ah oo sahlan in la fahmo. Ujeeddadu waa in qoys kasta uu helo hage wax ku ool ah oo ka caawinaya dhismaha reer degan, is jecel, is ixtiraama, kuna socda jidka toosan ee Islaamka.

HORDHAC QORAAGA BUUGGA

Marka hore, waxaan u mahadcelinayaa Alle SWT oo ii suurtageliyay qorista buuggan. Ujeeddada aan buuggan u qoray waa inaan akhristaha siiyo aqoon, faham, iyo waayo-aragnimo faa'iido leh oo ku saabsan mowduuca uu buuggu ka hadlayo.

Buuggan wuxuu ka dhashay fikir, cilmi-baaris, iyo waqti badan oo aan geliyay sidii uu u noqon lahaa mid akhristaha anfaca. Waxaan rajeynayaa in qof kasta oo akhriya uu ka heli doono wax uu noloshiisa iyo aqoontiisa ku kordhiyo.

Sidoo kale, waxaan u mahadcelinayaa dhammaan dadka igu dhiirrigeliyay qorista buuggan, gaar ahaan qoyskayga, asxaabtayda, iyo cid kasta oo taageero ii muujisay.

Haddii aad akhriste aad ka hesho buuggan faa'iido, talo, ama dhiirrigelin taas waxay ii noqonaysaa guusha ugu weyn ee aan ka gaaro qorista buuggan.

Mahadsanid.

QORE: ABUKAR MOHAMED NUR
Email: abukarmaxamednur1@gmail.com
Snapchat:dalmarcade5

QAAMUUSKA QORAALKA

CONTENT PAGE

QAYBTA KOOWAAD – Aasaaska Qoyska Wanaagsan 9

Chapter 1: Fahamka Qoyska iyo Muhiimaddiisa 9

1.1 Waa maxay qoys wanaagsan? 9

1.2 Aabaha wanaagsan waa kuma? 10

1.3 Hooyada wanaagsan waa kuma? 10

1.4 Qoyska Muslimka ah ee casriga ah 10

Chapter 2: Jacaylka iyo Doorashada Lammaanaha 12

2.1 Sidee loo doortaa lammaane wanaagsan? 12

2.2 Isfahamka ka hor guurka 12

2.3 Khaladaadka dhalinyarada sameeyaan 12

2.4 Guurka ku dhisan ixtiraam 13

2.5 Technology-ga iyo xiriirka jacaylka 13

QAYBTA LABAAD – Nolosha Guurka iyo Mas'uuliyadda Qoyska 14

Chapter 3: Bilowga Nolosha Guurka 14

3.1 Sidee loo dhisaa guri farxad leh? 15

3.2 Khaladaadka burburiya guurka 15

3.3 Jacaylka guurka kadib 15

3.4 Dhaqaalaha qoyska 16

Chapter 4: Doorka Aabaha 17

4.1 – 4.4 (Mas'uuliyad, Carruurta, Casriga ah, Xaaska) 17

Chapter 5: Doorka Hooyada 34

5.1 – 5.4 (Tarbiyad, Casriga ah, Maskaxda, Gabdhaha) 18

QAYBTA SADDEXAAD – Tarbiyadda Carruurta 22

Chapter 6: Barbaarinta Carruurta 22

6.1 – 6.4 (Ilmaha yar, Waxbarasho, Mobile-ka, Islaamka) 23

Chapter 7: Dhibaatooyinka Dhalinyarada 25

7.1 – 7.4 (Saaxiibo, Balwado, Akhlaaq, Badbaadinta) 25

QAYBTA AFRAAD – Technology-ga iyo Qoyska Casriga ah 27

Chapter 8: Technology-ga iyo Saameyntiisa 27

8.1 – 8.4 (Internet, Social Media, Ilaalinta, AI) 28

Chapter 9: Xallinta Khilaafaadka Qoyska 29

9.1 – 9.4 (Sababaha, Xalinta, Furriinka, Badbaadinta) 29

QAYBTA SHANAAD – Mustaqbalka Qoyska Muslimka ah 32

Chapter 10: Dhismaha Jiil Wanaagsan 32

10.1 – 10.4 (Hoggaamiyeyaasha, Ganacsi, Caafimaad, Guuleysta) 32

QAYBTA KOOWAAD

AASAASKA QOYSKA WANAAGSAN

Chapter 1: Fahamka Qoyska iyo Muhiimaddiisa

Qoyska waa hoyga ugu horreeya ee qofku ku barto jacaylka, akhlaaqda, masuuliyadda iyo nolosha bulshada. Ilmaha yar marka uu dunida yimaado, qoyska ayuu ka bartaa hadalka, dhaqanka, ixtiraamka iyo xiriirka dadka kale. Sidaas darteed, haddii qoyska uu noqdo mid wanaagsan oo ku dhisan diinta Islaamka, jacaylka iyo wada noolaanshaha, bulshada inteeda kale way hagaageysaa.

1.1 Waa Maxay Qoys Wanaagsan?

Qoys wanaagsan ma aha qoys lacag badan leh oo keliya, balse waa qoys ay ka jirto nabad, kalsooni, jacayl iyo ixtiraam. Waxaa jira qoysas dhaqaale ahaan hodan ah laakiin aan lahayn farxad iyo wada noolaansho wanaagsan. Sidoo kale waxaa jira qoysas nolol dhexdhexaad ah ku nool balse leh qalbi degan iyo xiriir wanaagsan.

Astaamaha Qoyska Wanaagsan

- Wadahadal wanaagsan
- Iscaawin iyo wada shaqeyn
- Ixtiraam dhexmara xubnaha qoyska
- Tarbiyad ku dhisan diinta Islaamka
- Xallinta dhibaatooyinka si deggan
- Ilaalinta sirta qoyska

Qoyska wanaagsan wuxuu carruurta siiyaa amni maskaxeed iyo kalsooni. Carruurta ku barbaarta guri jacayl leh waxay noqdaan dad bulshada waxtar u leh.

Doorka Qoyska ee Bulshada

Bulsho kasta waxay ka bilaabataa qoys. Haddii qoysasku hagaagaan, bulshada oo dhan way hagaagaysaa. Qoyska wanaagsan wuxuu soo saaraa:

- Carruur akhlaaq leh
- Dhalinyaro masuul ah
- Dad ixtiraama waalidka iyo bulshada
- Jiil leh aqoon iyo diin

Marka qoyska uu burburo, waxaa kordha dhibaatooyinka dhalinyarada, maandooriyaha, anshax xumada, kalinimada iyo walbahaarka. Sidaas darteed, dhismaha qoys wanaagsan waa masuuliyad weyn oo saaran waalidka.

1.2 Aabaha Wanaagsan Waa Kuma?

Aabaha wanaagsan waa tiirka qoyska. Isagu wuxuu masuul ka yahay ilaalinta reerka, hagidda carruurta iyo dhismaha mustaqbalka qoyska. Hoggaaminta wanaagsan ma aha xanaaq iyo amar badan, balse waa xikmad, dulqaad iyo jacayl.

Astaamaha Aabaha Wanaagsan

1. **Mas'uuliyad** : Wuxuu ka shaqeeyaa nafaqada reerka, badbaadadooda, waxbarashada carruurta iyo ilaalinta diinta reerka.
2. **Waqti Siinta Carruurta** :Wuxuu la sheekeystaa, dhegeystaa, dhiirrigeliyaa waxbarashada, una baro akhlaaqda wanaagsan.
3. **Tusaale Wanaagsan** : Wuxuu leeyahay hadal wanaagsan, salaad joogto ah, daacadnimo iyo samir.

1.3 Hooyada Wanaagsan Waa Kuma?

Hooyadu waa qalbiga qoyska. Waxay door weyn ku leedahay tarbiyadda, jacaylka iyo isku xirnaanta reerka. Hooyo wanaagsan waxay guriga ka dhigtaa meel deggan oo carruurtu ku dareemaan ammaan iyo naxariis.

Astaamaha Hooyada Wanaagsan

4. **Dulqaad**: Carruurta waxay u baahan yihiin samir badan marka la koriyaa.
5. **Tarbiyad Wanaagsan** :Waxay carruurta bartaa akhlaaqda, nadaafadda, salaadda iyo ixtiraamka dadka waaweyn.
6. **Fahamka Waqtiga Casriga ah**: Waxay fahamtaa social media, waxbarashada online-ka iyo khatarta internet-ka.
7. **Dhisidda Kalsoonida** : Waxay dhiirrigelisaa hibadooda, dhistaa kalsoonidooda.

1.4 Qoyska Muslimka ah ee Casriga ah

Qoyska Muslimka ah maanta wuxuu wajahayaa caqabado cusub: social media, dhaqan qalaad, mashquul badan, iyo saameynta internet-ka. Si kastaba ha ahaatee, qoyska Muslimka ah wuxuu awoodaa inuu ilaashado diintiisa iyo akhlaaqdiisa haddii uu yeesho qorshe wanaagsan.

Sidee Loo Dhisaa Qoys Muslim ah oo Casri ah?

8. **Ilaalinta Salaadda**: Salaaddu waa tiirka qoyska Muslimka ah. Qoyska wada tukada wuxuu yeeshaa degganaansho, midnimo iyo barako.
9. **Wadahadal Joogto ah** : Waalidka iyo carruurtu waa inay yeeshaan waqti ay ku wada hadlaan maalin kasta.
10. **Xaddidaadda Technology-ga**: Qoyska wanaagsan wuxuu leeyahay waqti aan mobile la isticmaalin, xeerar internet ah iyo kormeer carruurta.
11. **Jacayl iyo Naxariis** : Ku dayashada Rasuulka ﷺ ee akhlaaqda wanaagsan iyo naxariista qoyska.

Chapter 2: Jacaylka iyo Doorashada Lammaanaha

Guurka waa mid ka mid ah go'aamada ugu waaweyn ee nolosha qofka. Waa safar dheer oo u baahan jacayl, ixtiraam, dulqaad iyo masuuliyad. Qofka aad nolosha la wadaagayso wuxuu saameyn weyn ku leeyahay farxaddaada, mustaqbalka carruurta, degganaanshaha maskaxda iyo horumarka qoyska.

2.1 Sidee Loo Doortaa Lammaane Wanaagsan?

12. **Diinta iyo Iimaanka** : Qof Alle ka cabsada wuxuu ilaaliyaa xaaskiisa ama ninkeeda, wuxuu dhowraa qoyska, wuxuu ka fogaadaa dulmiga.
13. **Akhlaaqda iyo Dabeecadda** :Qofka leh akhlaaq wanaagsan wuxuu leeyahay dulqaad, xakameeyaa xanaaqa, yaqaan ixtiraamka.
14. **Himilooyinka Nolosha** : Lammaanaha wanaagsan waa inay yeeshaan himilooyin isu dhow ku saabsan carruurta, waxbarashada, shaqada, dhaqaalaha.
15. **Qoyska iyo Deegaanka** :Habka uu qofku ula dhaqmo waalidkiis wuxuu tilmaamayaa sida uu mustaqbalka ula dhaqmi karo qoyskiisa.

2.2 Isfahamka Ka Hor Guurka

Guurka wanaagsan wuxuu ka bilaabmaa isfaham wanaagsan. Dad badan waxay guursadaan iyagoo aan si dhab ah isu fahmin, taasina waxay keentaa khilaaf degdeg ah.

Maxaa Laga Wada Hadlaa Ka Hor Guurka?

- **Mas'uuliyadda Qoyska**: Waajibaadka guurka, doorka ninka, doorka xaaska, sida loo maareeyo khilaafka
- **Dhaqaalaha**:Shaqada, kharashaadka, kaydka lacagta, deymaha, qaabka nolosha
- **Carruurta iyo Tarbiyadda**:Tirada carruurta, qaabka tarbiyadda, waxbarashada, barbaarinta diinta
- **Xiriirka Qaraabada:** Xaddidaadda faragelinta, ilaalinta ixtiraamka labada reer

2.3 Khaladaadka Dhalinyarada Sameeyaan

- **Jacayl Degdeg ah**: Go'aan qaldan, kalsooni jab, murugo maskaxeed
- **Saameynta social media**: Isbarbardhig khaldan, filashooyin aan macquul ahayn, masayr
- **Kalsooni Degdeg ah:** Sirta oo la faafiyo, qiyaano, isticmaal xun
- **Dayaca Diinta:** Marka xiriirku ka fogaado shareecada, barako ayaa yaraata, khilaaf ayaa bata

2.4 Guurka Ku Dhisan Ixtiraam

16. **Kalsooni:** Waxaa dhisa daacadnimo, ballan oofin, hadal run ah, asturnaan.
17. **Daacadnimo:** Waxay abuurtaa nabad qalbi; lammaanaha daacadda ah waxay si cad uga hadlaan dhibaatooyinka.
18. **Samir:** Wuxuu ka caawiyaa lammaanaha xallinta khilaafka, ka fogaanshaha xanaaqa, ilaalinta jacaylka.
19. **Isqaddarin:** Is dhageysi, is dhiirrigelin, is taageer, ka fogaansho yasidda.

2.5 Technology-ga iyo Xiriirka Jacaylka

Technology-gu wuxuu beddelay qaabka dadka isu bartaan iyo xiriirrada casriga ah. Inkastoo uu leeyahay faa'iidooyin, haddana waxaa jira khataro badan.

- **Saameynta TikTok iyo Facebook**: Dad badan waxay waqtigooda ku lumiyaan mobile halkii ay wada hadal dhab ah yeelan lahaayeen.
- **Khataraha Xiriirrada Online-ka**: Been abuur, qiyaano, sawirro been ah, dad aan daacad ahayn.
- **Ilaalinta Asturnaanta Qoyska**: Qoyska wanaagsan ma faafiyo dhibaatooyinka guriga, sirta lammaanaha, muranka qoyska.

Guurka ku dhisan shareecada Islaamka, wada hadalka wanaagsan iyo jacaylka daacadda ahi wuxuu noqdaa hoy nabad leh oo lagu barbaariyo jiil wanaagsan.

QAYBTA LABAAD

NOLOSHA GUURKA IYO MAS'UULIYADDA QOYSKA

Chapter 3: Bilowga Nolosha Guurka

Bilowga nolosha guurka waa marxalad cusub oo muhiim ah oo laba qof ka dhigaysa lamaane wadaagaya nolol, masuuliyad, jacayl iyo mustaqbal. Waa waqti ay labada qof isku baranayaan si qoto dheer, isku fahmayaan dabeecadaha kala duwan, isla markaana dhisayaan saldhigga qoyska mustaqbalka.

3.1 Sidee Loo Dhisaa Guri Farxad Leh?

20. **Isfahamka Lammaanaha:** In la dhegeysto qofka kale, la fahmo dareenkiisa, la ixtiraamo aragtidiisa.
21. **Dulqaadka iyo Samirka:** Wuxuu ka hortagaa go'aamo degdeg ah, hadal dhaawac leh, kala fogaansho.
22. **Wada Shaqeynta Qoyska:** Nolosha guurka ma aha tartan balse waa iskaashi: is caawin, wada tasho, isla qaadid masuuliyadda.
23. **Waqti Wadajir ah:** Waqtiga yar ee tayo leh wuxuu ka qiimo badan yahay waqti badan oo aan xiriir jirin.

3.2 Khaladaadka Burburiya Guurka

- **Hadalka Xun:** Cay, yasid, qaylo badan, eedeyn joogto ah
- **Xanaaqa Badan:** Wuxuu dhaawacaa nabadda guriga, abuuraa cabsi, yareeyaa jacaylka
- **Ismaqal La'aanta:** Dhegeysi la'aan, qof walba oo doonaya inuu hadlo, faham xumo
- **Sirta Qoyska oo Banaanka Loo Saaro:** Kalsooni jab, faragelin badan, sumcad xumo
- **Dayaca Jacaylka:** Guurka kadib iloobidda hadallada wanaagsan, mahadnaqa, daryeelka lammaanaha

3.3 Jacaylka Guurka Kadib

Jacaylka dhabta ahi ma dhammaado guurka kadib, balse wuxuu u baahan yahay in la ilaaliyo oo la kobciyo.

- **Sidee Loo Sii Noolayn Karaa Jacaylka?** Hadal wanaagsan, dhoolla caddeyn, iscaawin, xasuus wanaagsan.
- **Waqtiga Lammaanaha:** Wadahadal deggan, wada socod, wada cunid, is dhageysi.
- **Isku Qurxinta iyo Nadaafadda:** Is daryeelku wuxuu qayb ka yahay jacaylka qoyska.
- **Taageeridda Midba Midka Kale:** Way is dhiirrigeliyaan, way is garab istaagaan, kama tagaan qofka marka uu dhib qabo.

3.4 Dhaqaalaha Qoyska

24. **Qorsheynta Lacagta:** Kala hormarinta baahiyaha, kaydinta lacagta, ka fogaanshaha khasaaraha aan muhiimka ahayn.
25. **Ka Fogaanshaha Deynta Badan:** In lagu noolaado awoodda jirta, in laga fogaado tartanka bulshada.
26. **Nolol Dhexdhexaad ah:** Qoyska farxadda leh ma aha kan wax kasta haysta, balse waa kan ku qanacsan waxa uu haysto.
27. **Wada Tashiga Dhaqaalaha:** Go'aamada muhiimka ah si wadajir ah loo qaato; wada tashigu wuxuu abuuraa kalsooni, midnimo, isfaham.

Jacaylka dhabta ahi ma aha hadal keliya, balse waa ficil maalin kasta lagu muujiyo naxariis, daryeel iyo masuuliyad.

Chapter 4: Doorka Aabaha

> Aabuhu waa tiir muhiim ah oo qoyska ka mid ah. Doorkiisu ma aha oo keliya inuu bixiyo dhaqaalaha reerka, balse sidoo kale waa hoggaamiye, macallin, ilaaliye iyo tusaale wanaagsan oo carruurta iyo xaaskiisu ku daydaan.

4.1 Aabaha Hoggaamiyaha Qoyska

Hoggaaminta qoyska ma aha amar iyo xanaaq badan, balse waa masuuliyad ku dhisan xikmad, naxariis iyo caddaalad.

- **Mas'uuliyadda Reerka:** Ilaalinta qoyska, nafaqada reerka, tarbiyadda carruurta, hagidda diinta, xallinta dhibaatooyinka
- **Go'aan Qaadashada Wanaagsan:** Ma degdego marka uu xanaaqsan yahay; wuxuu dhegeystaa qoyskiisa; wuxuu la tashadaa xaaskiisa
- **Caddaaladda:** Carruurta si siman ayuu ula dhaqmaa; midna kama hormariyo jacaylka
- **Tusaalaha Wanaagsan:** Aabaha amro wanaag keliya ma ahan; isagaa ku dhaqma marka hore

4.2 Aabaha iyo Carruurta

Carruurtu waxay u baahan yihiin aabe ka badan qof lacag bixiya. Waxay u baahan yihiin jacayl, waqti, hagid iyo dhageysi.

- **Waqti Siinta Carruurta:** La ciyaarista, wadahadalka, dhegeysiga dareenkooda, ka qeybgalka waxbarashadooda
- **Dhageysiga Carruurta:** Aabaha wanaagsan ma yaraysto dareenka carruurta; wuxuu si deggan u maqlaa caruurtiisa.
- **Dhiirrigelinta Waxbarashada:** Wuxuu dhiirrigeliyaa akhriska, taageeraa waxbarashada, iyo fahamka diinta islaamka.
- **Tarbiyadda Akhlaaqda:** Wuxuu carruurta baraa runta, xushmadda, naxariista, dulqaadka iyo amaanadda.

4.3 Aabaha Casriga ah

- **Fahamka Technology-ga:** Wuxuu fahmaa internet-ka, yaqaan social media, la socdaa apps-ka

- **La Socodka Internet-ka Carruurta:** Wuxuu dejinayaa xeerar internet ka, xaddidaa waqtiga mobile-ka, la hadlaa carruurta si furan
- **Badbaadinta Qoyska Digital-ka:** Password ammaan ah, ilaalinta xogta qoyska, ka taxaddarka dadka online-ka
- **Isku Dheellitirka Technology-ga:** Waqti aan mobile jirin, qoyska wada hadal, wada cunto, carruurta la ciyaaro

4.4 Aabaha iyo Xaaskiisa

28. **Ixtiraamka Xaaska:** Xaasku waa lamaane nolosha wadaagaya; wuxuu ku hadlaa hadal wanaagsan, ixtiraamaa dareenka xaaskiisa.
29. **Garab Istaagga Hooyada:** Korinta carruurta waa masuuliyad wadajir ah; wuxuu caawiyaa xaaskiisa, fahmaa daalka hooyada.
30. **Ka Qeyb Qaadashada Howlaha Guriga:** Caawinta gurigu ma yareyso qiimaha aabaha, balse waxay muujisaa naxariis iyo jacayl.
31. **Ilaalinta Jacaylka Guurka:** Wuxuu hadal wanaagsan ku muujiyaa jacaylka, xasuustaa muhiimadda xaaskiisa.

Qoyska jacaylku ka jiro wuxuu noqdaa meel carruurtu ku koraan iyagoo nabad qaba.

Chapter 5: Doorka Hooyada

Hooyadu waa qalbiga qoyska iyo ilayska guriga. Guriga ay joogto hooyo wanaagsan waxaa ka muuqda jacayl, degganaansho, nadaafad iyo tarbiyad wanaagsan. Carruurta inta badan waxay noloshooda ugu horreysa wax ka bartaan hooyadood.

5.1 Hooyada iyo Tarbiyadda

Tarbiyaddu waa hadiyadda ugu weyn ee waalidku carruurtooda siin karaan. Lacagta iyo hantidu way dhammaan karaan, laakiin tarbiyad wanaagsan waxay ilmaha la joogtaa noloshiisa oo dhan.

- **Jacaylka iyo Naxariista:** Jacaylka wanaagsan wuxuu carruurta siiyaa kalsooni iyo xasillooni maskaxeed
- **Baridda Akhlaaqda:** Runta, salaadda, ixtiraamka dadka waaweyn, naxariista, iscaawinta
- **Dulqaadka Tarbiyadda:** Hooyada wanaagsan ma quusato; waxay fahantaa in tarbiyaddu u baahan tahay samir, waqti iyo joogteyn

5.2 Hooyada Casriga ah

Nolosha maanta aad bay uga duwan tahay tii hore. Technology-gu wuxuu galay guri kasta, carruurtuna waxay la kulmaan waxyaabo badan oo cusub.

- Isticmaalka Technology-ga: Waxbarasho online ah, barashada xirfado cusub, xiriirka qoyska
- Maareynta Waqtiga: In waqtiga si wanaagsan loo qorsheeyo, in nasasho la helo, in howlaha la kala hormariyo
- Waxbarashada Online-ka: Waxay dhiirrigelisaa waxbarashada, la socotaa horumarka carruurta, ka caawisaa jadwalka

5.3 Hooyada iyo Caafimaadka Maskaxda

Hooyooyin badan waxay dadka kale daryeelaan iyagoo hilmaama caafimaadkooda. Daalka joogtada ahi wuxuu saameyn karaa maskaxda, jirka, dareenka iyo xiriirka qoyska.

- **Ka Hortagga Walbahaarka:** In lala hadlo qof lagu kalsoon yahay, in la helo waqti nasasho, in la sameeyo ducada iyo cibaadada
- **Nasashada Maskaxda:** Akhriska Qur'aanka, socodka, hurdo wanaagsan, waqti gaar ah oo nasasho
- **Isdaryeelka Hooyada:** Cunto caafimaad leh, hurdo heshaa, nasataa, is qadarisaa

5.4 Hooyada iyo Gabdhaha

Gabdhuhu waxay inta badan hooyadood ka bartaan hab nololeedka iyo dhaqanka dumarnimada.

- **Tarbiyadda Gabdhaha:** Jacayl, faham, wadahadal, hagid wanaagsan
- **Dhisidda Kalsoonida Gabadha:** Ma yarayso gabadheeda; ku dhiirrigelisaa waxbarashada, horumarka, akhlaaqda wanaagsan
- **Ilaalinta Sharafta iyo Akhlaaqda:** Waxay bartaa qiimaha nafteeda, ilaalinta diinta, xulashada saaxiibada wanaagsan

Qoyska ay hooyo wanaagsan joogto wuxuu noqdaa meel jacayl, degganaansho iyo akhlaaq wanaagsan ka muuqdaan.

QAYBTA SADDEXAAD

TARBIYADDA CARRUURTA

Chapter 6: Barbaarinta Carruurta

Carruurtu waa ubaxa qoyska iyo rajada mustaqbalka bulshada. Habka loo barbaariyo ilmaha maanta wuxuu saameyn weyn ku leeyahay qofka uu noqon doono berri. Tarbiyaddu ma aha oo keliya in ilmaha la siiyo cunto, dhar iyo hoy, balse waa dhismaha maskaxdiisa, akhlaaqdiisa, diintiisa iyo hab nololeedkiisa.

6.1 Tarbiyadda Ilmaha Yar

Carruurnimada hore waa marxaladda ugu muhiimsan ee nolosha ilmaha. Waxa uu ilmuhu barto xilligan yar yar waxay saameyn ku yeelanayaan shakhsiyaddiisa mustaqbalka.

- **Jacaylka iyo Daryeelka:** Ilmaha la habsiiyo, si wanaagsan loola hadlo, la dhegeysto, aan mar walba lagu qaylin
- **Baridda Anshaxa:** Salaanta, nadaafadda, ixtiraamka, run sheegidda, mahadnaqa
- **Nidaamka Hurdada iyo Nolosha:** Hurdo ku filan, waqti ciyaar, waqti waxbarasho, cunto wanaagsan

6.2 Carruurta iyo Waxbarashada

Waxbarashadu waa furaha horumarka. Waalidku waa inay fahmaan in waxbarashadu aysan ku koobnayn dugsiga oo keliya. Gurigu sidoo kale waa goob waxbarasho.

- **Dhiirrigelinta Akhriska:** Buugaagta carruurta, sheekooyinka faa'iidada leh, akhriska Qur'aanka, waqti akhris maalinle ah
- **Doorashada Waxbarashada Wanaagsan:** Akhlaaqda goobta waxbarashada, tayada, badbaadada ilmaha, saameynta deegaanka
- **Taageeridda Carruurta:** Ammaanta dadaalka, aan la barbar dhegin carruurta kale, la fahmaa awoodda ilmaha

6.3 Carruurta iyo Mobile-ka

Technology-gu wuxuu noqday qayb ka mid ah nolosha carruurta. Mobile-ka iyo internet-ku waxay leeyihiin faa'iidooyin badan, laakiin sidoo kale waxay leeyihiin khataro u baahan taxaddar.

Khataraha Mobile-ka

- **Hurdo yari -Waqti lumis - Balwad -Dhibaatooyin maskaxeed -Dabeecad xanaaq badan**

Xaddidaadda Screen Time

- In aan mobile lala seexan
- In waqtiga cuntada aan mobile la isticmaalin
- In waalidku la socdo waxa la daawanayo

Badbaadada Internet-ka

- In aysan la hadlin dad aysan aqoon
- In aysan bixin xog gaar ah
- In aysan rumeysan wax kasta oo internet-ka yaalla

6.4 Tarbiyadda Islaamka

Tarbiyadda Islaamku waa saldhigga ugu muhiimsan ee korinta carruurta. Ilmaha lagu barbaariyo diinta wuxuu yeeshaa akhlaaq wanaagsan, cabsi Alle, xushmad iyo naxariis.

32. Baridda Salaadda: Salaadda si tartiib ah loo baro; waalidku tusaale noqdo; salaadda lagu dhiirrigeliyo jacayl.
33. Qur'aanka iyo Diinta : Qur'aanku wuxuu qalbiga ilmaha geliyaa nuur, xasillooni iyo akhlaaq wanaagsan.
34. Xushmadda Waalidka: In la baro ixtiraamka waalidka, adeecidda wanaagga, hadalka wanaagsan.
35. Akhlaaqda Islaamka: Runta, naxariista, samirka, daacadnimada, iscaawinta.

Barbaarinta carruurta waa masuuliyad weyn oo u baahan waqti, dulqaad iyo jacayl.

Chapter 7: Dhibaatooyinka Dhalinyarada

Dhalinyaradu waa laf dhabarta bulshada iyo rajada mustaqbalka. Haddii dhalinyarada si wanaagsan loo barbaariyo, waxay noqonayaan jiil leh aqoon, akhlaaq iyo masuuliyad. Waqtigan casriga ah, dhalinyaradu waxay wajahaan caqabado cusub oo ka duwan kuwii hore.

7.1 Saaxiibada Xun

Saaxiibku wuxuu saameyn weyn ku leeyahay nolosha qofka. Dhalinyaradu inta badan waxay waqti badan la qaataan saaxiibadooda, waxayna si fudud ugu daydaan dhaqankooda.

- **Saaxiib wanaagsan wuxuu qofka ku dhiirrigeliyaa:** waxbarashada, akhlaaqda wanaagsan, diinta, horumarka
- **Saaxiib xun wuxuu u horseedi karaa:** dhaqan xumo, waqti lumis, balwad, dayaca waxbarashada

Sida Waalidku Uga Hortagi Karo

- Wuxuu carruurta la yeeshaa xiriir wanaagsan
- Wuxuu fahmaa saaxiibada ilmaha
- Wuxuu ku dhiirrigeliyaa saaxiibo wanaagsan
- Wuxuu ilmaha baraa kalsoonida naftiisa

7.2 Balwadaha Casriga ah

36. Mobile Addiction: Hurdo yari, kalinimo, waqti lumis, daal maskaxeed, is dhexgal yari.
37. Gaming Addiction :Waxbarashada oo hoos u dhacda, xanaaq badan, hurdo yari, waqti badan oo lumay.
38. Social Media Addiction: Isbarbardhig khaldan, murugo, kalsooni yari, walbahaar.

Sida Looga Hortago Balwadaha

- In waqti loo sameeyo isticmaalka mobile-ka
- In la helo ciyaaro iyo hawlo kale
- In qoyska wada hadlaan
- In dhalinyarada lagu dhiirrigeliyo waxbarashada iyo xirfadaha

7.3 Dhibaatooyinka Akhlaaqda

- Been Sheegidda: Waxaa lagu dhiirrigelin karaa: wadahadal wanaagsan, dulqaad, kalsooni
- Caasinimada: Dhalinyarada waxay u baahan yihiin qof fahma, ma aha qof mar walba canaanta
- Ixtiraam La'aanta: Marka tarbiyaddu daciifto waxaa yaraada xushmadda waalidka iyo akhlaaqda
- Saameynta Dhaqamada Qalaad : Waa muhiim in dhalinyarada lagu barbaariyo fahamka diinta iyo dhaqanka wanaagsan

7.4 Sidee Loo Badbaadiyaa Dhalinyarada?

39. **Wadahadalka:** Dhalinyaradu waxay u baahan yihiin qof dhegeysta; wadahadalka wanaagsan wuxuu dhisaa kalsooni, xiriir wanaagsan, furfurnaan.
40. **Dhiirrigelinta:** Ku dhiirrigelinta waxbarashada, xirfadaha, ganacsiga, horumarka.
41. **Diinta iyo Akhlaaqda:** Dhalinyarada lagu barbaariyo salaadda iyo Qur'aanka waxay helaan xasillooni qalbi.
42. **Hawlo Faa'iido Leh:** Ciyaar jirka ah, akhris, xirfado cusub, waqti qoys. Mashquulka wanaagsan wuxuu yareeyaa fursadda dhalinyaradu ugu dhacaan waxyaabo xun.

Marka dhalinyarada lagu barbaariyo diin, akhlaaq iyo kalsooni, waxay noqonayaan jiil wanaagsan oo bulshada horumar u horseeda.

QAYBTA AFRAAD

TECHNOLOGY-GA IYO QOYSKA CASRIGA AH

Chapter 8: Technology-ga iyo Saameyntiisa

Technology-gu wuxuu noqday qayb muhiim ah oo nolosha casriga ah ka mid ah. Ma jiro guri maanta ka maqan mobile, internet ama qalab casri ah. Inkasta oo technology-gu leeyahay faa'iidooyin badan, haddana wuxuu leeyahay saameyn qarsoon oo si toos ah u taaban karta qoyska, carruurta iyo xiriirka bulshada.

8.1 Internet-ka iyo Qoyska

Faa'iidooyinka Technology-ga

- Waxbarashada online-ka
- Shaqooyinka internet-ka
- Xiriirka qaraabada fog
- Barashada xirfado cusub
- Ganacsiga casriga ah

Khasaaraha Qarsoon

- Wadahadal yaraanta, Waqti la'aanta qoyska iyo Carruurta oo kaligood noqda
- Isticmaalka internet-ka xad dhaafka ah: daal maskaxeed, walbahaar, hurdo yari, kalinimo

8.2 Carruurta iyo Social Media

Baraha bulshada waxay noqdeen qayb weyn oo nolosha dhalinyarada iyo carruurta ka mid ah. TikTok, Snapchat, Instagram iyo apps kale ayaa saameyn ku yeeshay fikirka carruurta, hab dhaqankooda, waqtigooda iyo kalsoonida nafta.

- **TikTok:** Muuqaallo gaaban oo si degdeg ah u soo jiita carruurta; waxaa jira waxyaabo aan da'da ku habboonayn
- **Snapchat:** Waxay carruurta siin kartaa fursad ay si qarsoodi ah wax ugu wadaagaan; khatartu waa sawirro khaldan, xiriirro aan wanaagsanayn
- **Instagram:** Dadka isku barbar dhiga dadka kale oo internet-ka ku jira: murugo, kalsooni yari, walbahaar

8.3 Sidee Qoyska Loo Ilaaliyaa?

43. **Family Digital Rules:** In waqtiga mobile-ka la xaddido; in aan mobile lala seexan; in waalidku ogaadaan waxa carruurta daawanayaan.
44. **Password Security:** In password adag la sameeyo; in aan sirta lala wadaagin dadka kale; in laga taxaddaro dadka online-ka.
45. Waqtiyada Internet-ka: Qoyska wanaagsan wuxuu kala saaraa waqtiga waxbarashada, qoyska, nasashada iyo internet-ka.
46. Wadahadalka Qoyska: Qoysaska wada hadla waxay yeeshaan kalsooni, si fudud u ogaadaan dhibaatooyinka; carruurtu waxay dareemaan ammaan.

8.4 Artificial Intelligence iyo Qoyska

Artificial Intelligence oo loo yaqaan AI wuxuu noqday technology si degdeg ah u koraya. Faa'iidooyin badan ayuu leeyahay haddii si wanaagsan loo isticmaalo.

- AI iyo Waxbarashada: Barashada luqadaha, sharaxa casharrada, cilmi baarista, horumarinta xirfadaha
- AI iyo Ganacsiga: Suuqgeyn, maareynta shaqada, adeegyada macaamiisha
- AI iyo Tarbiyadda: AI ma beddeli karo jacaylka waalidka, wadahadalka qoyska, tarbiyadda wanaagsan, dareenka bani'aadamka

Qoyska technology-ga maamula wuxuu ka faa'iideysan karaa horumarka casriga ah laakiin qoyska technology-gu maamulo wuxuu lumin karaa xiriirka qalbiga.

Chapter 9: Xallinta Khilaafaadka Qoyska

Qoys kasta wuxuu maraa waqtiyo ay yimaadaan khilaafyo iyo isfaham la'aan. Ma jiro guri aan waligiis muran ka dhicin. Khilaafku laftiisu ma aha dhibaatada ugu weyn, balse dhibaatadu waxay noqotaa marka aan si wanaagsan loo maareyn.

9.1 Maxaa Keena Khilaafka?

47. **Dhaqaale:** Kharash badan, deyn, shaqo la'aan, qorshe la'aan lacagta, filashooyin ka badan awoodda jirta.
48. **Isfaham La'aan Dadku way qaldamaan:** xanaaq, murugo, kalsooni darro, kala fogaansho.
49. **Faragelinta Qaraabada:**Sirta qoyska oo banaanka baxda, qof walba oo talo kala duwan bixiya, kala shakiga lammaanaha.
50. **Waqti La'aanta:** Marka wada hadalku yaraado: fahamku wuu yaraadaa, jacaylku wuu daciifaa, muranku wuu kordhaa.

9.2 Hababka Xalinta Dhibaatooyinka

51. **Wadahadal Deggan:** Codka ha la dejiyo; qof walba ha hadlo; hadalka ha la kala dhameysto; eedeyn badan ha la iska ilaaliyo.
52. **Iscafiska:** Wuxuu dejinayaa qalbiga, soo celiyaa jacaylka, yareeyaa culayska maskaxda.
53. **Samirka:** Wuxuu qofka ka ilaaliyaa go'aamo degdeg ah, hadal dhaawac leh, kala tag degdeg ah.
54. **Talo Wanaagsan:** Mararka qaar qoyska wuxuu u baahan karaa qof dhexdhexaad ah oo caqli leh.

9.3 Furriinka iyo Saameyntiisa

Furriinku waa arrin culus oo saameyn weyn ku leh carruurta, waalidka, bulshada iyo mustaqbalka qoyska.

Mararka qaar furriinku wuxuu noqdaa xal kama dambeys ah, laakiin waa in aan lagu degdegin.

- **Saameynta Carruurta:** Cabsi, murugo, kalinimo, kalsooni darro; dhibaatooyin waxbarasho, xiriirka bulshada
- **Saameynta Bulshada:** Dhibaatooyinka dhalinyarada, dayaca carruurta, walbahaarka bulshada
- **Go'aanka Degdegga ah:** Qaar badan waxay furriinka ku gaaraan xanaaq ama hadal degdeg ah; waa in xal la raadiyo

9.4 Sidee Loo Badbaadiyaa Guurka?

55. La Tashiga: Go'aamada muhiimka ah si wadajir ah loo qaato; dareenka qofka kale la tixgeliyo; dhibaatooyinka si furan looga hadlo.

56. **Ducada iyo Diinta:** Salaadda, ducada, akhriska Qur'aanka, xasuusta Alle; diintu waxay qalbiga gelisaa samir, naxariis, xakameyn xanaaq.
57. **Waqti Wadajir ah:** Wada sheekeysi, socod, wada cunto, is dhageysi; waqti yar oo tayo leh ayaa ka qiimo badan maalmo badan oo aan xiriir jirin.
58. **Ixtiraamka iyo Jacaylka:** Lammaanaha wanaagsan isma caayaan, isma yasaan, isma dhaawacaan hadal ahaan.

Qoysaska guuleysta ma aha kuwa aan muran lahayn, balse waa kuwa yaqaan sida dhibaatada loo xalliyo iyagoo ilaalinaya jacaylka iyo ixtiraamka.

QAYBTA SHANAAD

MUSTAQBALKA QOYSKA MUSLIMKA AH

Chapter 10: Dhismaha Jiil Wanaagsan

Mustaqbalka bulshada wuxuu ku xiran yahay jiilka maanta la barbaarinayo. Carruurta maanta waa hoggaamiyeyaasha berri, waana dadka qaadi doona masuuliyadda qoyska, bulshada iyo diinta. Sidaas darteed, qoyska wanaagsan wuxuu xoogga saaraa dhismaha jiil leh akhlaaq wanaagsan, aqoon, mas'uuliyad, kalsooni iyo diin.

10.1 Carruurta Hoggaamiyeyaasha Noqonaya

Carruurta maanta waxay noqon doonaan dadka hoggaamiya bulshada mustaqbalka. Sidaas darteed, waa muhiim in lagu barbaariyo kalsooni, mas'uuliyad, akhlaaq wanaagsan iyo go'aan qaadasho wanaagsan.

- **Dhisidda Kalsoonida Carruurta:** Dhiirrigelinta carruurta, amaanta dadaalkooda, aan la yarayn awooddooda
- **Baridda Mas'uuliyadda:** Nadaafadda, ilaalinta waqtiga, caawinta qoyska, dhammeystirka shaqada
- **Baridda Hoggaaminta:** Tusaale wanaagsan, caddaalad, dulqaad, xikmad, xalinta dhibaatooyinka

10.2 Qoyska iyo Ganacsiga

59. **Baridda Ganacsiga Carruurta:** Qiimaha shaqada, sida lacagta loo maareeyo, kaydinta, daacadnimada ganacsiga.
60. **Fikirka Horumarka:** Ku dhiirrigelinta waxbarashada, xirfadaha, hal abuurka, ganacsiga xalaasha ah.
61. **Dhaqaalaha iyo Mas'uuliyadda:** In lacagta aan si xad dhaaf ah loo isticmaalin, in la kala hormariyo baahiyaha, in laga fogaado deynta badan.

10.3 Qoyska iyo Caafimaadka

Caafimaadka wanaagsan waa nimco weyn. Qoyska caafimaad qaba wuxuu awood u leeyahay shaqo, waxbarasho, cibaado iyo horumar.

- **Cunto Caafimaad Leh:** Khudaarta, miraha, biyaha, cunto dheellitiran; yareynta cuntada waxyeellada leh
- **Jimicsiga iyo Dhaqdhaqaaqa:** Qoysaska wada socda ama wada ciyaara waxay yeeshaan xiriir wanaagsan
- **Caafimaadka Maskaxda:** In qoyska wada hadlaan, qof walba dareenkiisa la fahmo, in la helo waqti nasasho

10.4 Qoyska Guuleysta

Qoyska guuleysta ma aha mid aan lahayn dhibaatooyin, balse waa qoys yaqaan sida loo wajaho caqabadaha iyagoo isku duuban.

Astaamaha Qoyska Guuleysta

- Isku Xirnaanta Qoyska – Jacayl, wada hadal, iscaawin, kalsooni
- Diinta iyo Akhlaaqda – Salaadda, Qur'aanka iyo ducadu waxay xoojiyaan xiriirka qoyska
- Jacaylka iyo Naxariista – Waqti siinta, iscaawinta, hadalka wanaagsan, is dhageysiga
- Horumarka iyo Mustaqbalka – Waxbarashada carruurta, tarbiyadooda, horumarka nolosha, ilaalinta diinta

Mustaqbal wanaagsan wuxuu ka bilaabmaa guri wanaagsan.

GUNAANAD

Qoyska wanaagsan waa tiirka bulshada. Marka waalidku u dadaalaan korinta carruur leh akhlaaq, aqoon, iimaan iyo masuuliyad, waxay fuliyaan waajibaadka ugu weyn ee Islaamku ku amray dhismaha jiil wanaagsan oo mustaqbalka ifaya ah.

Buuggan wuxuu bixinayaa tilmaamo wax ku ool ah oo ku saabsan aabanimada iyo hooyanimo wanaagsan, guurka, tarbiyadda, technology-ga, iyo dhismaha qoyska casriga ah iyagoo ku dhisan shareecada Islaamka, aqoonta cilmiga ah iyo waayo-aragnimada nololeed.

Haddii qoys kasta uu ka qaato buuggan erey keliya oo wax ku ool ah oo reerkooda ku dhaqmaan taas waxay ii noqonaysaa guusha ugu weyn ee aan ku xidhay jilicsan iyo baraq-baraqid.

Abukar Mohamed Nur
June 2026 · WhatsApp: 00252-618664545

Dhamaad